

Wax ka sii  
badan kasbo

Xirfad  
beddelasho  
samee

Tallaabada xigta ballanqaad  
loo sameynayo macaamiisha

Wax badan  
ka hel nolosha

Xirfado cusub  
horumari

Baro wax  
cusub

Ballanqaadka aan adiga kuu sameyneyno






## Tusmooyinka

Waa maxay Nexstep? .....	3
Ujeeddadeenna .....	4
Mas'uuliyadaha xaggaaga naga saaran .....	5
Waa maxay warka la helayo? .....	5
Waa maxay talada la helayo? .....	6
Sidee baad u heli kartaa adeegyadeenna? .....	7
War dheeraad ah ma u bahan tahay? .....	8

## Waa maxay nextstep?

Adeegyada nextstep waxaa loo qaabeeyey in kor loogu qaado qiimaha waxbarashada iyo shaqada ee dhammaan dadka waaweyn ee da'doodu tahay 20 iyo ka weyn.

Adeegyadaan waxaa loo qaabeeyey in lagugu caawiyo haddii aad u baahan tahay inaad hagaajisid ifafaalahaaga shaqo ama xirfado, inaad heshid shahaaddo ama aad inta ugu badan uga heshid shaqadaada. Adeegyada nextstep waxaa laga helayaa Ingiriiska oo dhan.



Dokumentigaan wuxuu kuu sheegayaa wax ku saabsan heerka adeegga aad ka filan kartid adeegga warka iyo talada nextstep. Waxaan soo dhaweyneynaa aragtiyadaada ku aaddan sida weli u sii hagaajin karayno adeegga aan qabanno. Waxaad nagula soo xiriiri kartaa adigoo noo soo maraya adeegga nextstep ee deegaankaaga – eeg shabakadeenna website [www.nextstep.org.uk](http://www.nextstep.org.uk) si aad u heshid faah faahinnada adeegga deegaanka.

Waxaad codsan kartaa nuqullada dokumentigaan oo ku qoran Carabi, Bengaali, Shiinees, Gujarati, Hindi, Bunjabi, Soomaali, Urdu iyo Fiyetnamees. Waxaad sidoo kale codsan kartaa nuqullada dokumentiga oo ku qoran Qoraalka dadka Indhaha la' ( Braille) iyo cajalado maqal ah.

Dadka ku hadla Bunjabi, Bengali iyo Sylheti waxay sidoo kale wici karaan **learndirect** iyagoo ka wacaya lambarrada soo socda:  
**08000 931 333 Bunjabi;**  
**08000 931 444 Bengali;**  
**08000 931 555 Sylheti.**

**learndirect** waxay ka jawaabi doontaa su'aalaha ku saabsan adeegyada tallaabada xigta.

## Ujeeddadeenna

Adeegga nextstep ee deegaanku wuxuu ku siin doonaa galaangal aad u yeelatid warka iyo talada ku aaddan waxbarashada iyo shaqada.

Meel kasta oo aad ka joogtid England, adeegga aad heli doontid wuxuu ahaan doonaa mid si isku mid ah u wada tayo sarreeya.



Waxaan ula jeednaa inaan:




- 1 noqonno kuwo la heli karo isla markaana la arki karo;
- 2 cilmi ku dhisnaano isla markaana nala aqoon karo;
- 3 lahaanno xiriirro wax ku ool ah oo u dhexeeya adeegyadeenna;
- 4 abbaarsanno adeegyadeenna ku wajahan baahiyahaaga;
- 5 abbaarsanno baahiyahaaga oo dhan innagoo ku deeqeyna adeeyo kala duwan;
- 6 ku deeqno war iyo talo aan eex lahayn si aan kaaga caawinno inaad go'aanno la isku wargeliyey aad u gaartid;
- 7 ka turjunno baahiyahaaga hadda iyo kuwa mustaqbalka ee adeegyada aan ku deeqno;
- 8 ahaanno kuwo saaxiibtinnimo gala oo dadka soo dhaweeya;
- 9 kugu dhiirrigelinno kuguna taageerno waxbarasho; iyo
- 10 kaa yeelno inaad la socotid dhammaan adeegyadeenna la helayo ee adiga wax kuu taraya.

## Mas'uuliyadaha xaggaaga naga saaran

### Waa maxay warka la helayo?

Waxaan ku siin karnaa:

- war daabacan, sida warqado qoran;
- qalabyo maqal iyo muuqaal ah, sida fiidiyow;
- war ku jira CD-ROM ama iyadoo loo marayo internetka; iyo
- war afka ah oo loo marayo kulanno weji ka weji ama khadad caawin telefoonno.



Waxaan ku siin karnaa war ku saabsan:

- sida iyo meesha aad warar kale ka heli karto;
- fursadaha barashada iyo shaqada deegaan ahaan la helayo;
- habab camali ah oo horey loogu gudbayo, sida sidaad u codsan lahayd shaqooyinka iyo sida u qorsheyn lahayd xirfad, iyo
- meesha loo aadayo war ku saabsan manfacyada, gaadiidka iyo adeegyada bilaashka ah ee loogu talagalay waxbarashada iyo shaqada.

## Waa maxay talada la helayo?

Adeegyadeenna talada waxaa lala jaanqaadsiin doonaa baahiyo gaar ah.

Waxaan (iyadoo ku xiran u qalmidda):

- ku siineynaa war shakhsi ahaaneed, kaasoo laga yaabo inuu micnahiisu yahay in lagu diro adeegyo kale;
- kaa caawineynaa qalabyada go'aan gaaridda;
- kaa caawineynaa inaad xirfadahaaga iyo danahaaga shakhsi ahaaneed aad ku xirtid baahiyadaada xirfadeed ama shaqo;



- cayimeynaa xirfadaha asaasiga ah ee laga yaabo inaad u baahato waxaan kuu direynaa ilaha kale ee caawinta si aad u heshid xirfado aasaasi ah ee aqooneed, luqadeed iyo tiro;
- kaa caawineynaa inaad fahamtid warka ku saabsan suuqa shaqada;
- ku siineynaa talo ku saabsan taageerada maaliyadeed ee la helayo, sida Deeqda Waxbarashada Dadka Waaweyn;
- ku siineynaa talo aasaasi ah oo ku saabsan adeegyada aad heleysid waqtiga shaqo iska eryidda, marka lagu daro sidaan galaangal ugu yeelan lahayd iyada iyo meeshaad u aadi lahayd;
- ku siineynaa talo ku aaddan hababka lagu raadsanayo isla markaana lagu codsanayo shaqooyin, sida qoridda CV iyo xirfadaha wareysiga;
- ku siineynaa talo ku aaddan habab si aad horey ugu kacdid xirfadda shaqo, iyo
- kaala talineynaa waxa la helayo iyo wax aan la heleynin, kaalana hadlaynaa wax lagu beddesho.

## Sideed baad u heli kartaa adeegyadeenna?

Waxaad nextstep ku heli kartaa siyaabo kala duwan.

Waxaad awooddaa:

- inaad booqatid shabakadeenna [www.nextstep.org.uk](http://www.nextstep.org.uk) 24 saacadood maalintii;
- inaad booqatid xarunta tallaabada xigta, waxay furan tahay shan maalmood toddobaadkii; iyo
- inaad ballan qabsatid si aad u heshid talo saacadaha shaqada ka baxsan.



Waxaan ballanqaadeynaa:



- inaan kugula soo xiriirno muddo 24 saacadood ah ee warka. Tan waxay noqon kartaa qaabka dhanbaalka qoran, wicitaanka telefoonka ama e-mail, ama weji ka weji;
- in haddii aad u baahan tahay in calaamad lagu dhejiyo il dheeraad ah oo wareed iyo talo, tan waxaan ku sameyn karnaa muddo 24 saacadood ah ee xogweydiintii asalka ahayd;
- in haddii aan u baahanno aan warka uga ogaanno meel kale si markaas aan kuu caawinno, waxaan tan kuugu sheegi doonnaa muddo saddex maalmood oo maalmaha shaqada ah; iyo
- si aan kuu siinno ballan loogu talagalay talo muddo shan maalmood oo maalmaha shaqada ah ee aan ku helno codsigaaga.

### Ku siineyna adeegga aad u baahan tahay

Haddii aad naafonnimo qabtid ama dhibaato maqal oo saameyneysa habka aad u isticmaashid adeegyadeenna, waxaan ka wada hadli doonnaa habka ugu wanaagsan ee aan ku caawin karno.

## War dheraad ah ma u bahan tahay?

Booqo shabakadeenna [www.nextstep.org.uk](http://www.nextstep.org.uk)



Ama la xiriir:

[IAG contact details](#)

Funded by:



Leading learning and skills

FOI\_[Insert local reference number]

Somali